

Barnaamijka Gargaarka Guryaha ee COVID 19

Waa maxay Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ah ee COVID 19?

Barnaamijka Gargaarka Guryaha ee COVID 19 waxa uu siiyaa gargaar ka bixinta lacaga guryaha ah dadka si uu u caawiyo ka hortagga guryo ka saarida, hoy la'aanta iyo si ay u helaan xasiloonka dhanka deegaanka ah kireystayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha ee xaqqa u leh. Maamulayaal ka socda deegaanka ayaa dib u eega codsiyada shakhsiyadka iyo qoysaska codsanaya gargaarka si ay u xaqiijiyaan xaq u yeeladka ayna u dhameeyaan hawsha bixinta kharashaadka xaqqa u leh in la bixiyo iyagoo matalaya qoysaska.

Anigu xaq ma u leeyahay inaan codsado?

Si ay xaq ugu yeeshaan gargaarka dhanka guryaha ah, qoysaska reer Minnesota waa khasab inay ka soo baxaan dhamaan shuruudahan soo socda:

Dakhli ka hooseeya 300% habraaca aqoonsiga saboolnimada ee dolwada dhexe, iyadoo si gaar ah loo gargaarayo dadka dakhligoodu yahay ama ka hooseeyo 200% habraaca aqoonsiga saboolnimada ee dolwada dhexe.

Leh kharash xaq u leh in la bixiyo oo la galay ka dib Maarso 1, 2020 oo aan wali la bixin. Dhaqaalaha Gargaarka dhanka Guryaha waxaa kaliya oo loo isticmaali karaa kharashaadka xaq u leh in lagu bixiyo ee la galay mudadii u dhaxeysay Maarso 1, 2020 ilaa iyo Deseember 30, 2020.

Aan awoodin inuu bixiyo hal ama in ka badan oo ah bixinada lacagta la isku leeyahay iyadoo sababtu tahay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo timid oo keentay shaqo la'aan, jiro ama arrimo kale oo u dhacay cudurka dillaacay ee COVID-19 awgii.

Kharashyadee ayaa la bixinayaa?

Barnaamijku waxa uu bixiyaa kharashaadka guryaha la xiriira ee la isku leeyahay sida:

Bixinta kirada | Bixinta amaahda Guriga (Mortgage) |
Bixinta heshiisyada qandaraasyada | Bixinta kirada dhulka
guryaha la qaado la dhigto | Bixinta kharashaadka
korontada | Bixinta Khidmada ururada Mulkiilaha

Sidee ayaan u codsadaa?



Wac 211

Khad Bilaash ah: 1-800-543-7709
Deegaanka: 651-291-0211



Booqo [211unitedway.org](https://www.211unitedway.org)



Dhambaal (text) ugu dir
"MNRENT" ama "MNHOME"
ku 898-211

Khadka caawinta ee 211 waxa uu leeyahay shaqaale afaf badan ku hadla oo loo carbiyey inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan Barnaamijka Gargaarka dhanka Guryaha ah ee COVID-19 waxa aana la heli karaa 8:00 subaxnimo – 8:00 fiidnimo Isniinta ilaa iyo Jimcaha.

